

Waalidku xataa Wuu Tiriyaa

Ka caawi cunnugaaga - Tirinta

Tirintu waxay ka mid tahay khibradaha ugu horreeya ee ay ilmuhu helaan "tirinta". Tirintu waxay la bilaabataa barashada kelmado isku xiga, sida heesaha ga xanaanada. Mar kasta oo uu siyaado carruurta tirinteedu, waxay bilaabaan in ay kelmadaha laxidhiidhiyaan tiro ama lambarka shay yaasha.

Sidee ilmuhu ubartaan sida wax loo tiryo iyo sida loo isticmaalo lambarada?

Ku celcelin ayey ilmuhu ku bartaan tirinta kelmadaha. Ugu horayn, xidhiidhka lambaradu waxaa laga yaabaa in uu kala go'o iyadoo ilmuhu kategayo nambar, ama ilmuhu samaynayo nabaro cusub. Waa wax caadiya in aad maqashid ilmaha oo leh Labaatan-toban kadib markuu sheegay Labaatan iyo sagaal.

Sikataba ha ahaatee, xasuusinta kelmadaha lambarkasta sida saxda ah ee ay isugu xigaan waa jidka keliya ee tirinta. Si ay wax u tiriyaan carruurta waxay u baahan yihiin wax isu dhigma sida, markay sheegayaan nambar waa in ay haystaan tiro "shayo" u dhigma.

Ilmaha waa in lasiiyo fursad badan oo ay kaga shaqeeyaan ama ku daah furaan tirinta kooxaha (cutubyada) sidoo kale samaynta kooxaha. Ilmuhu waxay u baahan yihiin inay xasuus taan lambarada magic yadooda.



Waalidku xataa Wuu Tiriya

Guriga maxaad ka qaban kartaa?

- Latiri ilmahaaga tirada badhamada markaad xidhanaysid shaadhka ama funaanada.
- Ku dhiiri geli ilmahaagu in uu ururiyo biinaka lagu wadhay dharka.
- Tiri tirada jaran jarada laga bilaabo albaabka ilaa sanduuqa boosta.
- Tiri tirada ukun ku jirta kartoona, marlabaad tiri kadib markaad qaar ka saartay.
- Tiri intajeer ee adiga iyo ilmahaagu aad isu tuurteen kubad iyadoon idinka dhicin.
- Akhri oo kahadal sheekooyin ama heesaha tirooyin leh.
- Kuhees heeso ama xanaanada heesaheeda kaasoo ayku jiraan nambaro sida shanta booloboolo ee yayar ama Baa Baa wankii madoobaa.
- Ilmahaagu hatiriyo sida ugu dhaqsaha badan ee uu/ay awoodo dabadeed ilmahaaga ku dhiiri geli in uu kula tiriyo markaaga.
- Usheeg ilmahaaga in uu tirada ka bilaabo lambar aan ahayn kow. Tani waxay ka caawinaysaa markay u baahan yihiin in ay isku daraan laba kooxood ama tirinta waxay ka bilaabi karaan kooxda badan.
- Waydii ilmahaaga in uu kuu sheego nambarka kahoreeya ama kadanbeeya nabar kale. Imisaad riraysaa sanadka danbe? Intee baad jirtay sanadkii hore?
- Waydii ilmahaaga markaad miiska dhigayso weelka wax lagu cunayo, sida, in uu ku siiyo inta aad ubaahan tahay saxamo, koobab, ama qaadada, fargeetada iyo midida qof kasta.
- Ciyaar ciyaaraha sida Dominoes, Masaska(snakes) iyo jaran jarooyinka, cayaaraha turubka ama boodhka laxidhiidha laadhuuga kaasoo leh dhibco qaabeed. Kani wuxuu ka caawinayaa ilmahaaga in uu garto dhibcaha kadibna tiriyo. Rog laadhuuga si uu ilmahaagu u akhriyo una garto lambarada.



Waalidku xataa Wuu Tiriya



- Ururi kadibna kala sooc xaaxeeyooyinka. Tiri imisa ayaa ku jira kooxwalba.
- Fiiri oo sheeg Taarikada Baabuurta iyo calaamadaha laamiga.
- Waydii ilmahaaga in uu kaa caawiyo tirada gabalada markii aad jarjarto cunto sida, beiga, kuwaji(quiche), khudrada ama sanguwayjka.
- Kartoomo madhan kasamee beer xayawaan. Latiri ilmahaaga tirada tooy xayawaanka marka uu/ay gelinayo/gelinayso xeradiisa. Waydii su,aalo sida: xeradee ayey ku jiraan xayawaanka ugu badani?
- Ka caawi ilmahaagu inuu xasuusto taleefankaaga iyo inuu riixo batoonada saxda ah ee taleefanka.